



OTTAWA-CARLETON
DISTRICT SCHOOL BOARD



BARNAAMIJKA WARBIXINTA KAADHKA

Gudiga Iskuullada Degmada Ottawa-Carleton waxay soo saareen xidhiidh khadka internet ka ah oo aad ka helayso Kaadhka Warbixinta kaas oo u ogolaanaya waalidiinta inay arkaan kaadhka warbixinta ee cunugooda. Waalidku waxay u baahan yihiin inay isdiwaangaliyaan si ay u galaan xadhiidhkan.

MAXAAN SAMEEYAA MARKA XIGTA?

Raac hanaankan saddexda tallaabo ah si aad uhesho Xidhiidhka Kaadhka Warbixinta:

1. Isdiwaangeli



2. Gal



3. Eeg Warbixinta Kaadhka

TAARIIXHAHA MUHIIMKA AH

Kaadhadhka warbixinta ee **Dugsiyada Hoose** waa la heli doonaa **Juun 24, 2020**

Kaadhadhka warbixinta ee **Dugsiyada Sare** waxa la heli doonaa **Luulyo 3, 2020**


1. SIDA LA ISU DIIWAANGALIYO

Si aad isu diiwaangeliso, waxaad u baahan tahay macluumaadka soo socda:

- **Cinwaanka emailka** ee Waalidka / Wakiilka / Qofka lala xidhiidhayo,
- **Magaca koowaad** ee Waalidka / Wakiilka / Qofka lala xidhiidhayo,
- **Magaca dambe** ee Waalidka / Wakiilka / Qofka lala xidhiidhayo,
- **Lambarka Guriga** — lambarka ku yaal cinwaanka guriga ee ilmaha ugu yar ee ka diiwaangashan dugsiga OCDSB, iyo
- **Taariikhda dhalashada** ee ilmaha ugu yar qoyska ee ka diiwaangashan dugsiga OCDSB.

Markaad hesho dhamaan macluumaadka loo baahan yahay dhag kasii [Barnaamijka Warbixinta Kaadhka](#) ama booqo:

<https://compass.ocdsb.ca/portal/parent/index.do> oo dhag kasii xidhiidhka ama linkiga ka muuqda sawirkan hoose.



Gali macluumaadka sidii loogu talagalay si aad u dhammaystirto hawsha diiwaangelinta. Xaqiiji si aad u hubiso inaad qaybta waalidiinta la dooratay. Xaqiijinta marka la samaynayo, waxaad heli doontaa emayl si aad uga shaqaysiiso akownkaaga.

Markaad ka shaqaysiiso akoonkaaga, waxaad awood u yeelan doontaa inaad isticmaasho bogga. Ha iloobin inaad ka hubiso emayl-kan khaanada isbaamka ee iimaylkan.

Si aad u hesho tilmaamo faahfaahsan booqo:
ocdsb.ca/reportcardportal

DAAQADDA WADAHADALKA

Haddii aad dhibaatooyin la kulantid muddada diiwaangelinta, waxaad isticmaali kartaa daaqada wadhadalka ee ku taal geeska midig hoose ee bogga galitaanka si aad ula xidhiidhdo shaqaalaha taageerada.

TAAGEERO

Macluumaadka aad galisay waa inuu la mid yahay macluumaadka uga diwaangashan dugsiga ilmahaaga. Haddii aad u baahan tahay caawimo, fadlan iimayl u soo dir reportcards@ocdsb.ca ama wac 613 596-8738.

Kaliya waxaad u baahan tahay inaad isdiwaangaliso hal mar, xattaa haddii uu kuu dhigto in ka badan hal cunug OCDSB dhexdiisa. Akoonkaagan amaanka ahi waxa uu kuu sahlayaa inaad hesho dhammaan kaadhada warbixinta ee caruurtaada.

2. GAL

Markaad ka shaqaysiiso akoonkaaga, waxaad awood u yeelan doontaa inaad khadka toos u gasho. Si taas loo sameeyo, dhagsii Gal ama booqo: <https://compass.ocdsb.ca/portal/parent/index.do>

Gali magacaaga aad ku isticmaasho (cinwaanka emaylka) iyo nambarka ama erayg sirta ah. Fadlan la soco in ikhtiyaarka 'Ku gal akoonkaaga Google ka' aan loo isticmaalaynin galitaanka khadka.

Guji batoonka gelitaanka ee ku yaala dhanka hoose bidix shaashadda. Waa inaad aqbasho shuruudaha gelitaanka.



Shaashadda Galitaanka waxay leedahay saddex tab/qaybood oo kor ah - macallimiinta, waalidiinta iyo ardayga. Fadlan xaqiiji inaad dooratay taabka ama qaybta waalidiinta marka aad isdiwaangalinayso ama khadka galayso.


Dib u beddel nambarka ama ereyga sirta ah

Haddii aad illowday erayga ama nambarka sirta ah, isticmaal linkiga 'Waan illaaway lambarka/ereyga sirta ah, halkan dib uga bedel' (fiiri sawirka hoose). Si aad uhesho tilmaamo faahfaahsan guji halkan ama booqo ocdsb.ca/reportcardportal



3. FIIRI KAADHKA WARBIKINTA EE CUNUGGAAGA

Marka khadka online ka ah aad toos u gasho, shaashadda bilawga ayaa soo bixi doonta halkaas oo aad ku arki doonto kaadhka warbixinta ee cunuggaaga iyo macluumaad kale. Kaadhka warbixinta ma ahaan doonaan diyaar waxaana lagu muujin doonaa 'Lama heli karo' ilaa Juun 24, 2020, ardayda dugsiiga hoose iyo Luulyo 3, 2020, ardayda dugsiiga sare.



OTTAWA-CARLETON
DISTRICT SCHOOL BOARD

